

TAMPERE.
FINLAND

# KOTI TAMPERE.

## BARNAAMIJKA KA QAYBGALINTA WADDANKA EE MAGAALADA TAMPERE

2021–2025

TAMPERE

# HORDHAC

Barnaamijka cusub ee ka qaybgalinta waddanku waa talaabo hore u socod ah oo cusboonaysiinta qaab dhismaha adeegga magaalada Tampere. Barnaamijka ka qaybgalinta waddanku wuxuu sharaxayaa oo uu bandhigayaa adeegyada ka qaybgalinta waddanka ee magaalady ay leedahay qaab maamulkeeda haay'adaha kala duwan iyo xaaladda imika. Adeegyada la soo saaray ama haay'addu udub dhexaad uma aha e waxaan udub dhexaad uga dhigaynaa dadka Tampere soo dagay ee waddamada dibadda ka soo guuray. Mowduuca ka qaybgalinta waddanka waxaa muhiim u ah in laga fikiro cidda adeegga loo soo saarayo iyo sida uu qofkaasi u arko ka qaybgalkiisa waddanka. Tampere ma tahay meel qofka waddanka ka qaybgalayaa uu u arko in uu la qabsan karo iyo meel uu u arki karo in uu qayb ka yahay bulshada, meel uu ku horumarin karo aqoontiisa iyo shaqogaliddiisa.

Barnaamijka cusub ee ka qaybgalka waddanka ee magaaladu wuxuu xidhiidh muhiim ah la leeyahay aqoonta caalamiga ah iyo barnaamijka soo galootiga ee istratejiyada leh ee markii u horreysay lagu shaaciyay Tampere 2019. Barnaamijka istratejiyada leh hiigsigiisu waa in la horumariyaa soogalootiga lagu xushay aqoonta, shaqobixiyuhu inay si caalami ah u shaqaalaysiiyaan iyo nidaamka ka qaybgalinta waddanka ee loogu baahanyahay dadka waddanka soo dagay ee xoojinaya wadashaqaynta nawaaxiga iyo qaabdhismeedka adeegyada waaraya. Qaabdhismeedka adeegyada wada socda wuxuu kabayaa dadka degmada soo dagay inay si dhakhso ah ula qabsadaan magaalada iyo bulshada.

Barnaamijka istrateejiga ah wuxuu bixinayaa yool iyo ishaaro jihada loo socda ah ee wadashaqaynta mustaqbalka. Markaan isaga isticmaalnay waxaan si go'aanqaadasho leh u kobcinay adeegyada aqoonta caalamiga ah ee Tampere ee ay ku jiraan mowduucaas adeegyada shaqaalaysinta iyo aasaasidda shirkadaha ku jira. Intaas waxaa noo dheer inaan kobcinay qaab dhismeedka haay'adaha kala duwan ka dhex dusaya ee tusaale ahaan sooshalka iyo caafimaada, dhaqanka iyo wakhtiga firaaqada iyo barbaarinta iyo adeegyada waxbarista.

Adeegyadayada horumarinaya ka qaybgalka waddanku waxay sameynayaan nidaam badbaado ah oo qofka cusub uu iskaga arki karo in uu qayb mushtamaca kamid ah oo firfircoon yahay. Annagu waxaan kugu taageeraynaa oo an kugu dhiirigalinaynaa in aad Tampere hoy ka dhigato!

**Mari Taverne**
*Maamulaha adeegyada aqoonta*
*iyo xirfadleyaasha caalamiga ah*

# BARBILOWYADA BARNAAMIJKA KA QAYBGALINTA WADDANKA

Barnaamijka cusub ee magaalada Tampere wuxuu isku keenayaa adeegyada magaalada ee kabaya ka qaybgalka waddanka ee ku socda dadka waddamo dibad ah uga soo guuray Tampere. Sababaha ay halkan u imanayaan way badanyihiin (tusaale ahaan qoyska, shaqada, waxbarashada ama magangaliyo caalami ah) qof kasta oo ka qaybgalaya waddanka qisadiisu ka kale way ka duwantahay. Tampere waxaa ku noolaa sannadkii 2020 qiyaastii 19 000 oo af kale ku hadla, intaasi waa 8 % oo ka mid ah shacabka. Afafka ugu badan ee lagu hadlo waa af ruush, af carabi, af farsi, ingiriis iyo af estooniya.

Sababta u soo guuritaanka waddanka ayaa badanka jihaysa adeegyada uu helayo qofku waxaana suuro gal ah inay faalo ka sii bixiso baahidiisa adeeg ee mustaqbalka oo dhan. Sidoo kale sharciga horumarinta iyo adeegyada kale ee degmooyinka waxaa haga sharciga oo qeexa adeegyada loo soo saarayo qofka waddanka ka qaybgalaya.

Barnaamijkan ka qaybgalka waddanka hiigsigiisu waa in uu sharraxo oo uu bandhigo adeegyada ka qaybgalka waddanka ee magaalada Tampere, waxaayna magaaladu ku leedahay door udub dhexaad ah oo agaasimenimo ah, laakiin qayb ka mid ah waxaa soo saara haay'ado kale (tusaale ahaan dowladda ama ururada). Waxaan ku qaabaynaa broseeska ka qaybgalka waddanka si uu qofku u fahmo jihooyin kala duwan oo adeegyada ah anagoo adeegsanayna. Qofku ha ahaado ilmo yar, qof dhallinyar ah ama qof wayn, waxaan u horumarinaynaa ka qaybgalkiisa waddanka sida ugu suura galsan annaga oo la shaqaynayna haay'ado kala duwan.

Waxaan halkan ku soo koobnay tusaaleyaasha barnaamijka ee ka qaybgalka waddanka ee lagu guulaysaty iyadoo dad kala duwan oo nolol kala duwan soo maray iyagoo iyagu ka warramaya xaaladahooda. Barnaamijkayaga ka qaybgalku waddanku waxa weeyaan mid ay ka faa'idi karaan dadka Tampere soo dagaya ee ka qaybgalaya waddanka wuxuuna bixiyaa sawir faseex ah oo muujinaya adeegyada ka qaybgalka waddanka ee la heli karo. Hiigsigayagu waa in an ahaano magaalo aqoomeed si caalami ah dadka u soo jiidata oo ay fududdahay in laga qayggalo maadaama ay bixiso adeegyo faseex ah oo si fudud loo heli karo.

Bogga xiga waxaa lagu soo koobay mawduucyada barnaamijka dib u dajinta. Nuxurka arinkaan waxaa si faahfaahsan looga hadlay hagaha oo ku qoran luqadaha Finnishka iyo af Ingiriiska.

**1. BARBILOWYADA BARNAAMIJKA KA QAYBGALINTA WADDANKA**
1.1 Xidhiidhka ay la leeyihiin hiigsiyada istrateejiga ah ee magaalada
1.2 Isku dubba ridka adeegyada ka qaybgalinta waddanka iyo aqoon ku maamulidda
1.3 Howl wadaaaga, wadashaqaynta shabakadaha iyo guddiga wada tashiga soo galootiga
1.4 Isgaarsiinta afafka badan
1.5 Eraybixinada ka qaybgalinta waddanka

**2. QAABILAADDA QAXOOTIGA IYO MAGDHOWYADA DOWLIGA AH EE WAXQABADKA KA QAYBGALINTA WADDANKA**
2.1 Qaabilaadda qaxootiga ee Tampere
2.2 Magdhowyada dowladda

**ADEEGAYAGA HORUMARINAYA KA QAYBGALKA WADDANKA**

**3. TAAGEERIDDA NOLOL WANAAGGA CARRUURTA IYO DHALLINYARTA IYO AWOODOHOODA**
3.1 Ka qaybgalinta waddanka ee barbaarinta curdinka iyo waxbarasho-horaadka
3.2 Ka qaybgalinta waddanka ee waxbarashada aasaasiga ah
3.3 Afafka kala duwan ee lagu qaadan karo barbaarinta curdinka iyo waxbarashada aasaasiga ah
3.4 Barbaarinta iyo waxbarista labada af lagu qaato
Kaydka adeegyada
Qiso ku saabsan ka qaybgale waddan: Carolina

**4. IDIDIILO LAGA HELO XIRFADLEYAASHA CAALAMIGA AN KU SOCONO WAJAHADDA KA QAYBGALKA WADDANKA IYO NOLOSHA SHAQADA**
4.1 Ka qaybgalinta waddanka ee dugsiga darajada labaad
Kaydka adeegyada dugsiga darajada labaad
4.2 Ka qaybgalinta waddanka ee adeegyada shaqaalaysiinta iyo korriinka adeegyada aqoonta iyo xirfadleyaasha caalamiga ah
4.3 Adeegyada ganacsadaha bilowga ah iyo ganacsiga nooca startup
Kaydka adeegyada
Qiso ku saabsan ka qaybgale waddan: Ali

**5. WADASHAQAYNTA CAAFIMAAD IYO AMNI BULSHO OO NOLOL MAALMEEDKA AH AYAA LAGU HELAA**
5.1. Ka qaybgalinta waddanka ee adeegyada sooshaalka iyo caafimaadka
5.2 Marxaladaha kala duwan ee nololeed adeegyada ku jira ee ka qaybgalinta waddanka taageeraya
5.3 Adeegyada ka qaybgalinta waddanka ee qaxootiga taageeraya
5.4 Da' yar kaligii waddanka yimidday adeegyada lagu taageero iyo daryeelka dambe ee ka qaybgalinta waddanka
Kaydka adeegyada
Qiso ku saabsan ka qaybgale waddan: Sarah iyo Mazen

**6. SII DHIIRAN IN LOOGA QAYBQAATO DHAQANKA IYO JIMICSIGA**
6.1 Nololwanaag iyo hiwaayado xaaladaha kala duwan ee nolosha
6.2 Aqoonta magaalada ee dhaqdhaqaaqa ku timidday iyo awooda jidhka
Kaydka adeegyada

**7. DEGGENAANSHAHA IYO NAWAAXIGA TAAGEERAYA KA QAYBGALKA WADDANKA**
7.1 Ka qaybgalinta waddanka ee qorsheynta magaalada iyo degganaanshaha
7.2 Kahortagga horumarka kala soocan ee nawaaxiyada

**8. HOWLWADAAGGA DEGMADA EE WAXQABADKA KA QAYBGALINTA WADDANKA**